JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD, 2023

# AF-SOOMAALI

2023

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA

SomExams

OK

SOM EXAMS

Wadarta

Magaca ..................................................

Dugsiga..................................................

R/ lambar................................................

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**GUDDIGA IMTIXAANAADKA QARANKA**

**IMTIXAANKA SHAHAADIGA AH EE FASALKA 8AAD**

# AF-SOOMAALI

**2022-2023**

**Waqtiga : 2 Saacadood**

**10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.**

**TILMAAMO**

- Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay **08** waraaqood oo daabacan.
- Tiri oo wargeli horjoogaha haddii ay wax kaa maqan yihiin ama dheeraad yihiin.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay **5** qaybood :

| | | |
|---|---|---|
| QAYBTA KOOWAAD : | Sheeko | 30 dhibcood |
| QAYBTA LABAAD : | Maanso | 20 dhibcood |
| QAYBTA SADDEXAAD : | Naxwe | 10 dhibcood |
| QAYBTA AFRAAD : | Isku beeg | 10 dhibcood |
| QAYBTA SHANAAD : | Curis | 30 dhibcood |
| **Dhibcaha guud** | | **100 dhibcood** |

- Ka jawaab dhamaan qaybta $1^{aad}$ – $5^{aad}$.
- Lama oggola Mobile iyo waraaqo kale.

## QAYBTA KOOWAAD: SHEEKO

**Barbaariyihii i Rabeeyey**

### AKHRI SHEEKADAN DABADEED KA JAWAAB WEYDIIMAHA LAGAA WEYDIIYEY.

Malcaamadu waxa ay ii ahayd xabsi aan ku qasbanahay, balse aanan ka habsaamin. Weligay qur'aanka juska saddexaad maan gaadhi jirin. Alxaaqa, Musamil iyo meelahaas baan wareegaysan jiray. Xataa sidaan halkaas ku soo gaadhay garan maayo, waayo higgaadaba maan aqoon. Ma rabin mana doonayn inan qur'aan barto, xataa niyad iyo nafsad toona uma hayn, sidaas darteed war lagu farxo oo malcaamada ka yimi gurigayaga maan gayn jirin.

Qalqaallinimada heerkaan ka gaadhay wareer buu ahaa. Waxan ku tallaabsan jiray falal caruurta ila da'da ahi in ay sameeyaan iska daaye, xataa aanay ku riyoon karin inay ku dhacaan. Dagaalka, qaska, budhacadnimo kooxeed, shiidka iyo kadeedka adduun oo dhami xaraabo loo xiiso ayey ii ahaayeen. Macallimiintayda, mid dugsi dhigaya iyo mid malcaamad dhigayaaba, usha iyo guulguulka way igala quusteen, waayo umaba joojin jirin, wax la isku cabsi geliyana xaggayga kama ay ahaynba. Imika iyada oo la i garaacay ayaan isla wixii la igu dilayey in yar ka dib samayn jiray, weliba waqtiyada qaar kas iyo caragsi dartii aan ugu celin jiray. Qalqaallinimadaydu mid ku talo gal ah oo qorshaysan bay ahayd!!! Tusaale ahaan, Waxan lahaa saraawiil jeans ah oo aan illaa jilbaha intaan ku jaray surwaalka ka hoos xidho si aan ushu waxba ii yeelin.

Xagga dugsiga, Maadooyinka Af carabiga iyo Diinta, macalimiinta dhiga xaggayga lagama jeclayn, heellanaanna kuma aan dhigan jirin xiisad ay leeyihiin. Sidaas darteed saaqid baan ku ahaa. Fasalkii koowaad ilaa kii Afraad ee dugsiga hoose, markaan ugu sarreeyey 30% ayaan keenay. Hasa yeeshee ma dhici jirin oo inta kale waan ka adkaa, laakiin kaalmo hore ma geli jirin, oo labadan maaddo xaggooda waan ka ku liitay. Sannadkii Afraad qaybtiisii dambe ayaa maadooyinkii Carabiga iyo Diinta 150 laga dhigay. Waa la isku soo galay, anna fadhi iima yaallo.!!!!

Inkasta oo ay da'daydu 12 jir ahayd, Naftayda intaan meel cidlo ah la tegay, ayaan runta u soo sheegay. Go'aankii aan ugu soo taliyeyna aan ku soo gadh-qaaday. Waa go'aankii ugu horreeyey ee aan iskay u gaadho aniga oo aan xataa waalid ka talo gelin. In aan Af-carbeedka barto ayaan si kal iyo laab ah u guddoonsaday. Waxan is tusay in aanan 150 derejo wada waayi karin, qasabna ay tahay in aan Af-carbeedka bartaa. Niman wadaado ah oo masaajid kitaab Arbiciin ah ku akhriyaya ayaan isku dhiibay. Qof aan seeskaba ka dhisnayni muxuu ka dheefi arbiciin iyo xadiis. Hasa yeeshee, maskax da'yar go'aan kama dambays ahna soo qaadatay baan ahay, erey kasta waan xafidayaa. Nasiib darrase hadhaw haddii qor la i yidhaa ma soo roganayo. Sidii ku dhammeeyey arbiciinkii. Dabadeed waxa la bilaabay kitaab kale oo xadiis ah. Waa kitaabka la yidhaa Mukhtasar Al-bukhaari. Anigu af carbeed baan raadinayaa laakiinse isuma arko inan yoolkaygii baal marsanahay. Nasiib wanaag, Sheekh ii adeer ahaa oo diinta yaqaanay, maalin gurigayagii ha iigu yimaado anigoo kitaabkii weynaa subcinaya isuna haysta caalim weyn, welibana si istusnimo ah kor ugu qaylinaya!!!!!



© SLNECB, 2023

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

"Adeer ma kitaabkan ayaad dhigataa" ayuu i weydiiyey. Si kalsooni leh ayaan ugu idhi "Haa adeero." "Qur'aankii miyaad dhammaysay." Ayuu si deggan ii weydiiyey. "Mayee Alxaaqa ayaan marayaa" ayaan ugu jawaabay. "Ma adiga oo Alxaaqa marayaa ayaa Bukhaari laguu akhriyaa" isagoo leh ayuu intuu soo dhaqaaqay kitaabkii iga qaaday. Dabadeed intuu gacanta i qabtay ayuu ii geeyey Sheekhaygii Cabdillaahi Xirsi Muxumed Alle cimrigiisa ha raajiyee. Maalintaas wixii ka dambeeyey noloshaydii oo dhami way is bedeshay.

Salaan guud dabadeed waxa xigtay "Sheekh Cabdillaahiyoow ninkaas diinta bar" iyo "Waayahaye, gallinka dambe ha iigu yimaado tukaanka hebel ee aan xaggiisa dambe wax ku daalacdo". Gellinka dambe xilli waxbarasho iima ahayne waa xilliga aan hawlahayga kale u gacan baxo. Waa xilliga dheesha, dhalanteedka iyo wada xaraabaysiga asxaabta. yeelkadeede haddana inan u imanayo ayaan ku kala ballan qaadanay. Waa halkan halka uu ka bilaabmayo geeddigaygii Ruuxiga ahaa, waana isla goortan xilliga aan ka dhex baxayaa noloshaydii caruurnimo. Lixda sanno ee soo socota, waa halkan meesha aan rixliga dhiganayaa. Waa sheekh Cabdillaahi Xirsi Muxumed agtiisa, Allaha weyni Cissi iyo karaamo ha ku nooleeyee.

**GOOBO GELI JAWAABTA SAXDA AH** **(30 Dhibcood )**

1. Qoraaga sheekadu qur'aanka barashadiisa, waxa uu ka gaadhay
   b) Juska 10
   t) Juska 5
   j) Juska 2
   j) Juska 3

2. Qoraagu marka uu go'aansaday inu af-carbeedka barto, da'diisu waxa ay ahayd
   b) Qaan-gaadh
   t) Kurey
   j) Waayeel
   x) Midna

3. Sababta ugu weyn ee qoraaga ku kalliftay inu af-carbeedka bartaa waxa ay ahayd
   b) Xiise uu u qabay barashada afafka qalaad
   t) Imtixaanka inu ku gudbo
   j) Hilow iyo xiise uu u qabay barashada diinta
   x) B iyo T

4. Qoraaga sheekada halka uu kula ballamay sheekhiisu waxa ay ahayd
   b) Meel madarasad ah
   t) Meel meherad ah
   j) Meel masaajid ah
   x) Midna

5. Muddada uu qoraagu la joogay ee wax ka baranayey Sheekhiisa waxa ay ahayd
   b) 6 bilood
   t) 6 maalmood
   j) 6 sanno
   x) Intaba



© SLNECB, 2023

• www.somexams.com ❋ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

6. Sababta aanu qoraagu uga mahad sheeganayn wadaaddii hore ee kutubta u dhigay waxa ay tahay
   b) Wixii uu rabay wax aan ahayn ayey u dhigeen
   t) Isaga oo aan af-carbeedkii garanayn ayey cilmiga xadiiska u bilaabeen
   j) Way canaanan jireen
   x) Intaba
7. Qoraaga magaca sheekhiisu waxa uu ku sheegay inu yahay
   b) Sheekh Cali Faarax
   t) Sheekh Cabdillaahi Xirsi Muxumed
   j) Sheekh Nadiir aw Sahal
   x) Midna

8. Gellinka dambe waxa uu ahaa xilliga qoraagu u gacan baxo
   b) U adeegista waalidkii
   t) Asxaabta iyo ciyaarta
   j) Wax dhigashada iyo dugsiga
   x) Midna
9. Qoraaga sheekada, markii odayga u adeerka ahi kitaabkii uu dhiganeyey ka qaaday waxa uu isku haystay inu yahay
   b) Nin aqoon diineed leh
   t) Nin engineer ah
   j) Nin dhakhtar ah
   x) Dhammaan

10. Hadalka qoraaga ee ah "Malcaamaddu waxa ay ii ahayd xabsi aan ku qasbanahay balse aanan ka habsaamin" waxa uu uga jeedaa
    b) Maan jeclayn balse cid kale ayaa igu qasbi jirtay
    t) Meel xun baan u haystay
    j) Dani ku baday ayey ahayd
    x) Midnaba

**QAYBTA LABAAD: MAANSO.** **(20 Dhibcood)**

1. Kaakici wadaadkii dagaal laguna kaalmeeye.
   b) Sheeg dulucda meeriskan. (2 Dhibcood)

   ..........................................................................................................................
   ..........................................................................................................................
   ..........................................................................................................................

   t) Sheeg macnaha ereyadan:
      i. Kaakici. (2 Dhibcood)

      ..........................................................................................................................
      ..........................................................................................................................
      ..........................................................................................................................

      ii. Laguna Kaalmee. (2 Dhibcood)

      ..........................................................................................................................



© SLNECB, 2023

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

..................................................................................................................
..................................................................................................................

**2.** Guddoonkii lawada raaci jirey, gocanayaa mooyee.

b) sheeg dulucda meeriskan. (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

t) Sheeg macnaha ereyadan:

i. Gudoon. (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

ii. Gocanayaa. (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

3. Haddii aad lingaxo oon qalbiga lahashada u diido.

b) sheeg dulucda meeriskan. (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

t) Sheeg macnaha ereyadan:

i. Lingaxo. (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

4. Dhaqan soo jireenoo, saxan baanu leenahay.

b) Sheeg dulucda meeriskan, (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................

5. Waxaan ahay waadiga dugsiyada, waxaan ahay waanada macalinka.

b) Sheeg dulucda meeriskan, (2 Dhibcood)

..................................................................................................................
..................................................................................................................
..................................................................................................................



© SLNECB, 2023

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

## QAYBTA SADEXAAD: NAXWE. (10 Dhibcood)

1. Ka soo saar weedh kasta **falku** jira.

b) Geedi wuxuu dhigtaa quraanka (2 Dhibcood)

..................................................................................................

..................................................................................................

t) Casharka ayuu qorayaa Geedi. (2 Dhibcood)

..................................................................................................

..................................................................................................

j) Ma cuntay qadada. (2 Dhibood)

..................................................................................................

..................................................................................................

2. Ka soo saar weedh kasta xidhiidhiyaha ku jira.

b) Cab biyaha ama caanaha. (2 Dhibcood)

..................................................................................................

..................................................................................................

t) Geele iyo Geedi waa walaalo. (2 Dhibcood)

..................................................................................................

..................................................................................................

## QAYBTA AFRAAD: ISKU BEEG. (10 Dhibcood)

Isku aadi ereyadan hoos ku qoran

| # | B | | T |
|---|---|---|---|
| 1 | Fiin | | Miciinsaday |
| 2 | Ciirsaday | | Jar dheer |
| 3 | Qaw | | Awood |
| 4 | Qoon | | Shimbir |
| 5 | Karti | | Doog |
| 6 | Cosob | | Boodh |
| 7 | Habaas | | Kurka |
| 8 | Unuunka | | Nabar |
| 9 | Heego | | Xiise |
| 10 | Boholyow | | Daruuri |



© SLNECB, 2023

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTA SHANAAD: Curis.** **(30 Dhibcood)**

Labadan mawduuc ee hoos ku qoran mid ka dooro, kana qor curis aan ka yarayn 150 erey.

**B) Waxtarka xoolaha.**

**T) Waxtarka Aqoonta.**

.......................................................................................................

.......................................................................................................

.......................................................................................................

.......................................................Dhamaad.......................................................



© SLNECB, 2023

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © in cooperation with www.qalinqaad.com